

Wasaarada Caafimaadka

Xaashida Macluumaadka tallaalka COVID-19

Nooca 5.0 – Abriill 1, 2021

Dhokumentigan waxa uu bixiyaa macluumaadka aasaasiga ah keliya oo looguma talo gelin inay bixiyaan ama beddelaan meesha talada caafimaadka, cudur aqoonsashada ama daawaynta, ama talada sharciga ah.

Wakhtigan, tallaalka COVID-19 waxaa oggolaaday isticmaalka gudaha Canada Health Canada: [Pfizer-BioNTech tallaalka COVID-19](#), [tallaalka Moderna COVID-19](#), [Tallaalka AstraZeneca COVID-19](#), [tallaalka COVISHIELD COVID-19](#), iyo [tallaalka Janssen COVID-19](#). Macluumaadka tallaalka Janssen COVID-19 waxaa lagu dari doonaa dhokumentigan marka saadka loo xaqiijijo Canada. Dhammaan [tallaalka COVID-19](#) oo loo oggolaaday isticmaalka gudaha Canada waxaa qiimaysay Caafimaadka Canada, isticmaalka heerarka adaga. Caafimaadka Canada waxa ay ka sii warhayn doontaa dhammaan tallaalka si ay u hubiso inay badbaado iyo waxtar leedahay.

Fadlan u akhri xaashida macluumaadka si feejigan oo hubso dhammaan su'aalahaaga inay ka jawaabaan adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka ka hor inta aanad qaadan tallaalka.

Waa maxay COVID-19?

COVID-19 waa caabuqa uu sababo korono fayraska (SARS-CoV-2). COVID-19 waxaa la aqoonsaday wakhtiga koowaad Diisambar 2019 oo ilaa markaa waxa uu ku faafay adduunka si ay u sababto safmar. COVID-19 muhiim ahaan waxa loo gudbiyaa qof ilaa kuwa kale marka qofka cudurka qabaa uu qufaco, hindhisoo, heeso, hadlo ama neefsashado.. Waa muhiim in la ogaado in dadka cudurka qabaa ay faafin karaa caabuqa xataa haddii ay qabaan astaamaha. [Astaamaha COVID-19](#) waxaa ka mid ah qufaca, neef gaabni, qandho, qadhqadhyo, daal iyo waayida urta iyo dhadhanka. Dadka qaar qaba fayraska ma laha astaamo dhammaanba, marka kuwa kale ay qabaan astaamaha ee ka bilaabma degenaan ilaa mid aad u darran.

Sidee tallaalka COVID-19 uga hortaggaan COVID-19?

Dhammaan tallaalka waxay ku shaqeeyaan iyagoo usoo bandhigaya jidhkeena shay u eeg sida caabuqa markaa nidaamkeena difaaca jidhku waxa uu baran karaa sida loo soo saaro ilaalinta dabiiciga ah. Ilaalintan dabiiciga markaa waxay ka caawisaa si looga hortaggo jirada haddii ay ku gaadho fayraska COVID-19 mustaqbalka. **Kama qaadi kartid COVID-19 tallaalka.**

Macluumaadka badan ee faahfaahsan oo ku saabsan sida tallaalka COVID-19 ay u bixin karto ilaalinta waxaa laga heli karaa [Public Health Ontario's \(PHO\) Tallaalka COVID-19](#) bogga internatka [Waxa aad u Baahn tahay Inaad ka Ogaato ee Ku sabsan COVID-19](#) iyo [Tallaalka COVID-19: Qalabka Viral Vector-ee tallaalka ku salaysan.](#)

Dhammaan tallaalka COVID-19 ee loo oggolaaday isticmaalka gudaha Canada waxtar ayay u leeyihiin ka ilaalinta cudurka astaamaha leh, ee lagu xaqiijiyay shaybaadhka. Daraasadaha ballaadhan halka dadka ay qaateen labba garoojo oo tallaalka ah, dhammaan tallaalka waxa uu u shaqeeyay si wanaagsan si looga ilaaliyo dadka jirada ee astaamaha leh, ee COVID-19 shaybaadhku xaqiijiyay.

Waxtarka tallaalka 14 maalmood ka dib garoojada koowaad iyo ka hor garoojada labbaad waxaa lagu qiyaasaa 90% ee Pfizer-BioNTech iyo Moderna iyo in ka badan 70% AstraZeneca/COVISHIELD. Waxtarka tallaalka ka dib garoojada labbaad wakhtiga loo dhaxaysiiyay ee lagu taliyay waxa uu ka badan yahay 90% Pfizer-BioNTech iyo Moderna iyo in ka badan 80% tallaalka AstraZeneca/COVISHIELD.

Waa muhiim inaad qaadato labba garoojo oo tallaladan ah). Ilaalinta xiliga dheer ee ku lidka ah COVID-19 lama gaadho ilaa ka dib garoojada ama tallaalka labbaad laga helayo. **Dhammaan tallaalka COVID-19 ee loo oggolaaday isticmaalka gudaha Canada sidoo kale aad ayay ugu waxtar badan yihiin ka hortagga cusbitaal dhigida.**

Kumaa heli kara tallaalkan?

Taxanaha tallaalka buuxa waa in la siiyo dadka aan inay tallaalka qaataan laga joojin oo hadana loo ansixiyay kooxaha ahmiyada la aqoonsaday.

- Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 hadda waxaa loo oggol yahay dadka 16 sano jirka ah iyo kuwa ka wayn.
- Tallaalka Moderna COVID-19 hadda waxaa loo oggol yahay dadka 18 sano jirka ah iyo kuwa ka wayn.

- Tallaalka Moderna AstraZeneca COVID-19 COVISHIELD hadda waxaa loo oggol yahay dadka 18 sano jirka ah iyo kuwa ka wayn. Wakhtigan, Guiddida La talinta Qaranka ee Tallaalka(NACI) [waxay ku talinaysaa](#) in tallaalka AstraZeneca COVID-19 iyo COVISHIELD aan loo isticmaalin dadka waa wayn ee ka yar 55 sano jirka.

Si looogaado haddii aad u qalnto inaad hesho tallaalka wakhtigan ku salaysan ahmiyada fadlan tixtaac [Ontario Qorshaheeda Tallaalka COVID-19](#).

Ka hor inta aanad helin tallaalka ku wargeli adeeg bixiyaha ku siinaa adiga tallaalka haddii:

- Aad hadda dareemayo jiro ama aad leedahay astaamaha iyo calaamadaha COVID-19.
- Wuxaad hore u lahayd falcelinta xasaasiyada tallaalka COVID-19 ama wax tallaalka COVID-19 ka samaysan yahay, ama tallaal kale.
- Wuxaad leedahay xaalado xasaasiyado ama xasaasiyad.
- Wuxaad leedahay uur ama uuraysanaysaa ama naas nuujinaysaa.
- Difaacaaga jidhka ayaa daciiif ah i yaddoo ay sababtay cudur ama dawo ama waxaa lagugu aqoonsaday xaalada is weerarka jidhkaaga.
- Waad suuxday ama waad dawakhday ka dib qaadashada tallaal hore ama qaliin caafimaad ama waxaad ka baqataa irbadaha. Adeeg bixiyaha daryeelka caafimadamku waxa uu bixin karaa taageero si uu kuu caawiyo, tusaale ahaan ku talinta inaad hesho tallaalka addoo jiifa si looga hortago suuxdinta.
- Wuxaad qabtaa jiro dhiig bax ah ama waxaad qadanaysaa dawada saamayn karta xinjirowga dhiiga. Macluumadku waxay ka caawin doonaa adeeg bixiyaha ka hortagga dhiig baxa ama bararka irbada ka yimaada.
- Wuxaad qaadatay tallaal kasta oo kale (oo aan ahayn COVID-19) 14 maalmood ee la soo dhaafay.

[Tallooyinka Tallaalka ee Mujtanacyada Gaarka ah](#) dhokumnetiga hagitaanku waxa uu bixiyaa macluumaaad dheeraad ah ee dadka naasnuujinaya ama uurka leh, qaba xasaaxiyadaha, jidhoodu is weeraro, ama aad leedahay nidaamka difaaca jidhka liita oo ay sababto cudur ama daawayn, siiba kurayda aadka ugu halista badan natiijooyinka darran ee ka yimid COVID-19. Haddii aad qabto su'aalo waxa ku saabsan haddii tallaalka uu kugu habboon tahay iyaddoo ku salasayn xaaladaada caafimaadka, la hadal adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

Kumaa daahinaya helida tallaalandan?

- Shakhsiyadka helay tallaal kale (oo aan ahayn tallaalka COVID-19) 14 maalmood ee hore.
- Dadka qaba astaamaha jirada darran, shakhsiyadkan waa inay sugaan ilaa astaamaha ay si buuxda u xalismeen si la isaga ilaaliyo u nisbaynta wax ka sii darid ah oo ka yimaada jirrooyinka ee saamaynta xun ee la xidhiidha tallaalka.
- Shakhsiyadka qaba astaamaha COVID-19. Si loo yareeyo khatarka gudbinta COVID-19, haddii ay jiraan shakhsiyad imanaya rugta tallaalka/dhismaha, waxaa la fari doonaa inay raacaan tallaabooyinka caafimaadka dad waynaha maxaliga ah oo waxaa lagu dhiiri gelin doonaa inay is tallaalaan.
- Shakhsiyadka astaamaha leh iyo kuwa aan lahayn waxaa lagula taliyay inay is karantiimeeyaan iyaddoo ay sababtay caabuqa la xaqiijiyay ama laga shakisan yahay COVID-19 ama ay ugu wacan tahay xidhiidhka dhow ee xaalada COVID-19 waa inaanay xaadirin rugta ltallaalka oo waa inay sugaan.

Sidee loo qaataa tallaalka?

Tallaalka waxaa loo bixiyaa sidii irbada xaga gacanta sare (gudaha muruqa adag). Gobolku waxa uu raacayaa [Tallooyinka ka yimid Guiddida La talinta Qaranka ee Tallaalka \(NACI\)](#) si loo kordhiyo wakhtiga inta u dhaxaysa garoohada labbaad ee tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech, Moderna iyo tallaalka AstraZeneca/COVISHIELD ilaa 4 bilood ka dib garoojada koowaad.

- Tallaalka Pfizer-BioNTech, wakhtiga lagu talaiyay ee u kala dhexeeya ilaa garoojada labbaad waa 4 bilood ka dib garoojada koowaad.
- Tallaalka Moderna, wakhtiga lagu taliyay ee ukala dhexeeya ee garoojada labbaad waa 4 bilood ka dib garoojada koowaad.
- Tallaalka AstraZeneca iyo COVISHIELD, wakhtiga lagu taliyay ee ukala dhexeeya ee garoojada 4 waa 4 bilood ka dib garoojada koowaad.

Shakhiyaadku waa inaay helaan tallaalka isku midka ah ee COVID-19 ee taxanahooda buuxa ee tallaalka (waxa loola jeedaa shakhsigu waa inuu helaa tallaal isku mid ah garoojada koowaad iyo labbaad). Tallaalka noocyada kala duwan (tusaale, mRNA, beddelka fayraska) waa in looga fekeraa tallaalo kala duwan oo waa inaan lagu isticmaalin taxane isku mid ah.

Muxuu ka kooban yahay tallaalku?

| waxay ka kooban tahay | Pfizer-BioNTech | Moderna | AstraZeneca/ iyo COVISHIELD |
|-----------------------|---|--|--|
| Caafimaad | <ul style="list-style-type: none"> mRNA | <ul style="list-style-type: none"> mRNA | <ul style="list-style-type: none"> Fayraska aan tarmayn (ChAd) |
| Duxda | <ul style="list-style-type: none"> ALC-0315 ALC-0159 – a polyethylene glycol (PEG) 1,2-Distearoyl-sn-glycero-3-phosphocholine (DSPC) Kolostarool | <ul style="list-style-type: none"> 1,2-distearoyl-sn-glycero-3-phosphocholine (DSPC) Kolostarool PEG2000 DMG SM-102 | <ul style="list-style-type: none"> Disodium edetate dihydrate (EDTA) itanoolka L-Histidine L-Histidine hydrochloride monohydrate Polysorbate 80 |
| Aan caafimaad ahayn | <p>Cusb ooyinka</p> <ul style="list-style-type: none"> Dhaybasik soodhiyam fosfayt dhihaydarayt Monobasic potassium phosphate Bootaasiyam kaloraydh Soodhiyam kaloraydh | <ul style="list-style-type: none"> Asiidha asatik Soodhiyam asititayt tirihay darayt Tromethamine Tromethamine hydrochloride | <ul style="list-style-type: none"> Magnesium chloride hexahydrate Soodhiyam kaloraydh |
| sonkor | <ul style="list-style-type: none"> Sonkor | <ul style="list-style-type: none"> Sonkor | <ul style="list-style-type: none"> Sonkor |
| | <ul style="list-style-type: none"> Biyaha Mudditaanka | <ul style="list-style-type: none"> Biyaha Mudditaanka | <ul style="list-style-type: none"> Biyaha Mudditaanka |

Waa muhiim in dib loo eego liiskan si feejigan maadaama dadka qaar ay xasaasi ku yihii waxyaabaha ay ka kooban tahay, ay ku jiraan **Polyethylene glycol (PEG)**, iyo

polysorbate 80 iyo/ana **tromethamine**. Si kastaba ha ahaatee, tani si dhif ah ayay u sababtaa falcelinta xasaasiyada. Polyethylene glycol (PEG) waxaa laga helaa alaabta sida dawooyinka, alaabta diyaarinta xidmaha ee baadhitaanka xidmaha, dawada calool socod siinta, dawada qufaca, dawada kosmeetiga, kiriimka maqaarka, sheeyada dawada ee loo isticmaalo maqaarka iyo muddada qaliinka, cajiinka ilkaha, muraayadaha wiilkha lagu dhejiyo iyo milanka muraayada wiilkha. Polyethylene glycol sidoo kale waxaa laga heli karaa cuntadda ama cabbitaanka, laakiin lama oga inuu sababo falcelinta xasaasiyada ee cuntadda i yo cabbitaanka. Polysorbate 80 waxaa laga helaa diyaarinta dawada (sida saliidaha faytamiinka, kiniinka, iyo walxaha ku lidka ah kansarka) iyo kosmootiga. Tromethamine waa shay la mariyo jidhka marka la baadhayo, afka laga qaato iyo dawo laga qaato meel aan afka ahayn.

Waa maxay saamaynta xun ee tallaalka?

Tallaalka COVID-19, sida tallaalada oo dhan, waxa uu sababi karaa saamyn xun qof kastaana lama kulmo iyada oo kuwan aan la kulmin iyaga badanka waxay ka warbixiyaan saamayn xun. Saamaynta xun ee tallaalka ee badanka laga warbixiyo marka la qaato tallaalka COVID-19 waa falcelin jidhka ay ku jirto xanuun, guduudni ama barar goobta tallaalka, daal, madax xanuun, muruqyo xanuun, xanuunka kala goyska, qadhqadhyo, iyo qandho degen

Daraasadaha joogta ah ee tallaalkan COVID-19 waxay muujinayaan saamaynta khatarta ah ee xun ee tallaalka ee ilaa maanta la helay inay yihiin **kuwo aad u dhif ah**. Dadka qaatay tallaalka gudaha daraasadahan waxaa laga warhayaa muddo dheer wax kastoo saamaynaha xun ah.

Shaqaalahaa caafimaadka waxay u diyaar yihiin inay maareeyaan falcelinta darran ee xasaasiyada haddii ay dhacdo. Marka la qaadanayo garoojadaada labbaad ee tallaalka COVID-19, **u sheeg adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka bixinaya garoojada labbaad ee tallaalka haddii aad lahayd wax saamayn xun oo garoojada koowaad ahayd..**

Si dhif ah, tallaalka AstraZeneca/COVISHIELD waxaaa lala xidhiidhyay qaab dhif ah oo xijirowga dhiiga ah ka dib tallaalka. Dhakhaatiirta waxay tan ugu yeedhaan "difaaca tallaalku keeno xinjorowga dhiiga unugyada dhiiga oo yaraada" (VIPIT). Xinjirtan dhiiga waxay leedahay labba sifo oo muhiim ah, waxay dhacaan 4

ilaa 20 maalmood ka dib tallaalka, oo waxaa la xidhiidha unugyada dhiiga ee hoose (unugyo aad u yar oo dhiiga ah oo ka caawiyo xinjirta dhiiga inay joojiso dhiig baxa). VIPIT waxay u eegtahay inay dhif tahay, oo ka dhacdo meel kasta laga bilaabo 1 ka mid ah 125,000 ilaa 1 ka mid ah 1 malyan oo qof. Aad baa loogu yaqaanaa haweenka ka yar da'da 55. Fadlan arag [VIPIT Ka dib Tallaalka AstraZeneca COVID-19](#) wixii macluumaad dheeraada ah

[Health Canada](#) waxay qiimaysay tan oo waxay go'aan ka gaadhay faa'iidooyinka tallaalka AstraZeneca/COVISHIELD ee ka ilaalinta dadka reer Kanada COVID-19 si ay uga awood badato khataraha.. Xinjirowga dhiiga waa caadi, gaar ahaan dadka waa wayn. COVID-19 lafteeedu waxay la xidhiidhay sababida xinjirowga dhiiga, sidoo kale dhammaan tallaalka COVID-19 waxaa lagula talinayaad dadka lahaa xinjirowga dhiiga wakhtigii hore, ama kuwa leh taariikhda qoyska ee xinjirowga dhiiga ee helaya dawooyinka khafiifinta dhiiga.

Goormaan soo wacayaa adeeg bixiyahayga daryeelka caafimaadka?

Haddii aad la kullanto saamaynta xun ee werwerka kugu leh adiga ama aan u eekayn inay tagayso dhowr maalmood ka dib, la xidhiidh adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ama raadso daryeel caafimaad.

Booqo waaxda **gurmadka ugu dhow ama wac 911** haddii mid kastoo ka mid ah falcelinta ku lidka ah ay soo baxaan saddex maalmood gudahood ka dib marka la qaato tallaalka.:

- finan
- bararka wejiga ama afka.
- neefsashada oo dhib ah
- midab aad u liita iyo lulo aad u darran
- qandho badan (ka saraysa 40°C)
- isku soo ururka muruqyada
- astaamaha kale ee khatarta ah (tusaale, "biinanka iyo irbadaha" ama kabuubyo)

Haddii aad qaadataay tallaalka AstraZeneca/COVISHIELD oo ay kaa muuqdaan astaamaha soo socda ka dib markaad qaadato tallaalka **fadlan raadso daryeel caafimaad oo degdeg ah**:

- neefta oo gaaban
- xanuunka xabadka
- bararka ama qabowga gacanta ama lugta
- xanuunka caloosha oo joogto ah
- madax xanuun darran ama ka sii daraya ama araga oo aan wanaagsanayn
- nabaro yaryar oo badan, meelo cas ama basali ah ama qaybo dhiig ah maqaarka hoostiisa.

Waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa [qaybta caafimaadka dad waynaha maxaliga ahsi](#) loo waydiyo su'aalaha ama in laga warbixiyo falcelinta ku ldika ah.

Goormaan u soo noqonayaa garoojadayaada labbaad ee tallaalka?

Haddii tani tahay garoojadaada koowaad ee tallaalka COVID-19, hubso inaad u soo laabato tallaalkaaga labbaad sida ay ku farto rugta caafimaadka ama adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka ee kugu tallaalay adiga tallaalkii koowaad. Waa muhiim inaad hesho labba garoojo oo tallaal ah sidii iska ilaalinta COVID-19 mida wanaagsan maaha ilaa ka dib marka la qaato garoojada labbaad ee tallaalka. Soo qaado diiwaankaaga tallaalka marka aad u timaado garoojada labbaad. **Aad ayay u muhiim tahay in lahelo garoojada labbaad haddii aad la kullanto saamaynta xun ee tallaalka wakhtiga koowaad.**

Kumaan kala xidhiidhaa su'aalo kasta?

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la hadal adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ama qofka bixinaya tallaalka.